**Best Starts for Kids ee Magaalada Seattle iyo degmada King waxay ku faraxsan yihiin inay ku dhawaaqaan laba fursadood oo maalgelin ah:Daryeelka CarruurtaLacag-u-hayntu dhammaan shaqaalaha daryeelka ilmaha ee xaqa u leh ee ka shaqeeya Degmada King, iyo Deeqaha Xasilinta ee Waaxda Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska ee Gobolka Washington (DCYF) ganacsiyada daryeelka ilmaha shatiga u haysta.**

# Su'aalaha inta badan la is weydiiyo ee ku saabsan Lacagaha Haynta Xannaanada Ilmaha

1. **Waa maxay ujeedada Lacagta Haynta Xannaanada Ilmaha?**

   Magaalada Seattle waxay ka heshay $2.4 milyan JumpStart 14500- canshuurta kharashka mushaar bixinta, iyo degmada King waxay u qoondaysay $5 milyan oo ka timid Cashuuraha Best Starts for Kids Levy si ay u bixiso gunnada haynta oo hal mar ah ee shaqaalaha dhammaan xarumaha daryeelka carruurta ee DCYF-oo liisan wata, qoyska barnaamijyada daryeelka ilmaha, ama barnaamijyada da'da dugsiga ee ku dhex jira xadka King County. Kaalmada laga helo Canshuurta Mushahar bixinta ee Seattle JumpStart ayaa sidoo kale loo isticmaali doonaa in lagu taageero deeqda xasilinta ee bixiyayaasha Seattle u qalma (eeg qaybta dheeraadka ah ee Su'aalaha inta badan la is weydiiyo ee hoose).

2. **Yaa xaq u leh inuu codsado Lacagta Haynta Xannaanada Ilmaha?**

   Dhammaan shaqaalaha daryeelka carruurta ee la shaqeeya carruurta ay da'doodu u dhaxayso 12 jir ee jooga xarunta daryeelka carruurta ee DCYF-shaatiyeesan, barnaamijka daryeelka carruurta qoyska, ama barnaamijka da'da dugsiga ee gudaha xadka King County waxay xaq u leeyihiin in ay helaan lacagta heynta.

   <u>**Codsiga lacagahan waa in uu soo gudbiyaa loo shaqeeyaha.**</u> Xaaladaha bixiyayaasha daryeelka ilmaha qoyska, Codsadaha waa bixiyayaasha shaatiga haysta. Codsiga lacagahan waa in uu soo gudbiyaa loo shaqeeyaha.  Ganacsiyada hela lacagahan ayaa mas'uul ka noqon doona inay u gudbiyaan shaqaalahooda u qalma. Loo-shaqeeyayaasha waxa kaliya oo ku waajib ah inay u gudbiyaan lacagta shaqaalaha wali ku jira liiska mushaharka wakhtiga lacagta la helayo.

   Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan u-qalmitaanka:

- Dhammaan shaqaalaha daryeelka carruurta oo shaqeeya waqti-buuxa ama waqti-dhiman kuwaas oo ku jira liiska mushaharka taariikhda codsiga oo ka shaqeeya goobta xarunta daryeelka carruurta ee DCYF-shaatiyeysan, barnaamijka daryeelka carruurta qoyska, ama barnaamijka da'da dugsiga ee ku dhex yaal xuduudaha Degmada King waxay xaq u leehiin in la siiyo lacagta haynta.
- Shaqaaluhu waa inuu ka shaqeeyaa goob lagu xannaaneeyo carruurta oo ku taal xuduudda degmada King; uma baahna inay degaan King County.

- Barnaamijyada ka baxsan Degmada King uma qalmaan fursadan deeq-bixinta.
- Bixiyeyaasha aan shatiga haysan iyo saaxiibada qoyska, iyo dariska (FFN) daryeelayaasha ka shaqeeya Degmada King uma qalmaan.

3. **Waxaan ahay bixiyaha xanaanada caruurta qoyska oo si toos ah ula shaqeeya carruurta xarunteyda shatiyeesan ee DCYF.  Miyaan nafteyda u dalbi karaa lacag-haynta?**
   Haa.  Uma baahnid inaad shaqaale haysato. Haddii ganacsigaaga shatiga leh ee DCYF uu ku yaallo gudaha xuduudka Degmada King, waxaad isku tirin kartaa inaad tahay shaqaale u qalma.

4. **Anigoo ah daryeel ilmo qoys oo shati leh ama bixiye xarun ku saleysan, miyay tahay inaan u furnaado oo aan u adeego carruurta si aan ugu qalmo lacag bixintan?**
   Haa, waa inaad hadda furfuran tahay iyo aad carruurta aqbalayso.

5. **Waa maxay cadadka lacag bixinta?**
   Shaqaale kasta oo ka mid ah shaqaalaha xanaanada caruurta wuxuu heli doonaa lacag isku mid ah, iyada oo aan loo eegin xaalad-buuxa ama waqti-dhiman. Wadarta cadadka lagu abaalmariyo mushaharka aqoonsiga shaqaale kasta oo shati haysta waxay ku xidhnaan doontaa tirada guud ee shaqaalaha xaqa u leh ee ay caddeeyeen codsaduhu.

6. **Lacagahani ma yihiin kuwo tartan ah?**
   Maya, lacag bixintu maaha mid tartan ah. Dhammaan shaqaalaha daryeelka carruurta ee buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka waxay heli doonaan lacag isku mid ah.

7. **Bixiye ma looga baahan yahay inuu u adeego qoysaska helaya kabka  Working Connections Child Care state ama ka diiwaangashan Child Care Assistance Program (CCAP) si uu ugu qalmo?**
   Maya. Bixiyaha xanaanada caruurta ee DCYF-shatiyeesan oo ku yaal gudahaxadka degmada Kingway codsan karaan, haddii ay helaan ama aysan helin kaalmooyinka Working Connections Child Care (WCCC) ama Child Care Assistance Program (CCAP).

8. **Bixiyaha ma laga baahan yahay in ay ka diiwaan geshanyihiin Early Achievers?**
   Maya.  Bixiye kaste oo xanaanada Caruurta DCYF-shaatiyeysan oo ku jira xadka Degmada King waa codsan karaan.

9. **Maxaa loo isticmaali karaa lacagahan?**
   Si loo helo lacagta, bixiyayaasha waxa looga baahan doonaa inay heshiis la saxeexdaan Degmada King wakhtiga codsiga. Lacagta waa in si toos ah loo siiyaa shaqaalahooda u qalma. ***Bixiyeyaasha waxaa looga baahan doonaa inay hayaan diiwaannada ku saabsan isticmaalka lacagaha iyo inay siiyaan diiwaannada degmada King haddii ay codsadaan.***
   Mushaharka hayntani ma laha wax xaddidaad ah oo ku saabsan sida shaqaaluhu u isticmaali karaan lacagaha.

10. **Lacagaha si buuxda miya loo bixin doonaa?**
    Qadarka deeqda oo dhan horey baa lagu abaal marin doonaa, ka dib marka codsiga la ogolaado Bixiyeyaasha waxaa lacagta siin doona EFT ama jeeg lagu dirayo ciwaanka boostada ee ku qoran codsiga deeqda.

11. **Goorma ayay tahay inaan lacagtan u gudbiyo shaqaalahayga?**
    Mushaharka waa in loo qaybiyaa shaqaalaha labada wakhti ee soo socda ee mushahar bixinta ka dib markii uu helo lacag bixiyaha, gaar ahaan December 30, 2022.

12. **Haddii aan ahay wakaalad leh goobo xanaano caruur badan oo shatiyeesan oo ku yaala Degmada King, miyaan u baahanahay in aan soo gudbiyo codsiyo gooni ah goob kasta?**
    Haa. Barnaamijyadu waxay soo gudbin doonaan magacooda ganacsi iyo aqoonsiga shatiga DCYF # oo qayb ka ah codsiga. Codsi kastaa waa inuu lahaadaa nambar aqoonsi oo DCYF ah oo gaar ah. Meheradaha ku yaal xadka magaalada Seattle waxay sidoo kale u qalmi doonaan inay helaan deeqda xasilinta.
13. **Waa maxay dukumeentiyada aan u baahanahay inaan gudbiyo?**
    Ogeysiiska abaalmarinta ka dib, waxaad u baahan doontaa inaad soo gudbiso shatiga ganacsiga Gobolka Washington (lambarka UBI) ama shatiga daryeelka ilmaha ee DCYF. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad buuxiso oo aad saxiixdo foomka W-9.

14. **Lacag-bixinta ma la canshuuri karaa?**
    Lacagahaas waxaa loo tixgeliyaa dakhli. Ujeedooyinka canshuuraha, deeqaha waa in loola dhaqmaa si la mid ah dakhliga kale ee uu helo ganacsigaaga.

    Bixiyeyaasha waxay Haysan karaan ilaa 15% lacagaha loo qoondeeyay in lagu daboolo kharashaadka ganacsiga ee u gudbinta lacagahan shaqaalahooda wixii canshuur ah iyo/ama khidmadaha maamulka. Hadhaaga soo hadhay waa in si toos ah loogu gudbiyaa shaqaalahaaga nidaamka mushahar bixinta ee barnaamijka (ma aha sida kaadhadhka hadiyadda ama gunnada kale ee aan mushaharka lahayn). Fadlan la soco in haynta mushaar bixinta laga yaabaa in ay sii yareyso qaddarka magdhowga ugu dambeeya ee shaqaalaha gaarka ah

    Tusaale ahaan, haddii wakaaladaadu ay 20 qof ku sheegtay codsigaga, oo aad heshay $5,000, wakaaladaada waxa loo ogolyahay in ay haysato ilaa 15% (tusaale ahaan, taasi waxay noqonaysaa $750) si ay u daboosho cashuur kasta ama kharashaadka maamulka ee gudbinta mushaharka shaqaalahaaga. Tani waxay ka dhigan tahay in ay waajib kugu tahay inaad u gudbiso ugu yaraan $4,250 20ka shaqaale ee aad sheegtay.

    Ka raadso talo lataliyaha cashuuraha ee xirfada leh oo ku saabsan saamayntaada ganacsi.

15. **Bixiyeyaasha ma u baahan yihiin inay kaydiyaan oo ay soo gudbiyaan rasiidhada la xidhiidha lacag bixintan?**

Adeegga Dakhliga Gudaha wuxuu uga baahan yahay ganacsiyada inay xafidaan diiwaannada maaliyadeed muddo toddoba sano ah. Waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad siiso diiwaanka ku saabsan isticmaalka lacagahan degmada King.

16. **Ma jiraa wakhti kama dambays ah oo lagu codsanayo lacag bixintan?**
    Haa. Xilliga kama dambaysta ah ee codsigu waa Juun 27, 2022, **markay tahay 11:59 pm Saacadda Maalinta Badbaadinta Baasifigga.**

17. **Sidee bixiyaha u dalbadaa lacag bixinta?**
    Juun 13, 2022, bixiyeyaasha xanaanada caruurta ee ku yaal Degmada King waxay heli doonaan iimayl xiriiriyaha arjiga leh. Bixiyuhu wuxuu gujin doonaa linkiga codsiga deeqda, halkaasoo ay kaga jawaabi doonaan dhowr su'aalood oo gaagaaban oo ay ku jiraan magaca ganacsiga, ciwaanka, iyo lambarka aqoonsiga shatiga bixiyaha.

    Codsiga deeqda waxa laga heli doonaa onlayn qaabka afka Ingiriiska, Soomaali, iyo Isbaanish iyo qaab PDF ah oo ku qoran Amxaari, Shiine la Fududeeyey, iyo Fiyatnaamiis. Nooca PDF ee codsiga waxa laga yaabaa in la daabaco, la buuxiyo, loo gudbiyoDEELfunding@seattle.gov.

    Codsiga deeqda waxa lagu heli doonaa Ingiriis, Amxaari, Isbaanish, Shiine la Fududeeyay, iyo Soomaali, iyo Fiyatnaamiis.

18. **Maxaa dhacaya haddii bixiye u baahan yahay in laga caawiyo buuxinta codsiga?**
    La xidhiidh tababarahaaga Early Achievers si aad kaalmo u hesho. Haddi aanad garanayn qofka macalinkaagu yahay ama aanad lahayn tababarahaaga Early Achievers, fadlan wac khadka bixiyaha Khayraadka Xannaanada Ilmaha 1-800-446-1114.

19. **Sidee iyo goorma ayuu bixiyaha heli doonaa lacagta?**
    Ogeysiisyada abaalmarinta kama dambaysta ah waxaa la samayn doonaa dhammaadka Luulyo. Dhammaan bixiyeyaasha waxaa lagu ogeysiin doonaa xaalada abaal-marinta iimaylka. Bixiyeyaasha waxaa lagu siin doonaa bangiga si toos ah ama jeeg ku geynaya ciwaanka boostada oo ku qoran codsiga. Lacagaha la siiyo bixiyeyaasha waxa la diri doona inta u dhaxaysa Ogosto 1 - Oktoobar 31, 2022.

20. **Maxaa dhacaya haddii shaqaale ka tago barnaamijkayga ka dib markii codsiga la gudbiyay?**
    Haddii shaqaalaha lagu tiriyaa inay u qalmaan codsiga aan hadda ka shaqayn goobtaada daryeelka ilmaha, oo ay tani ka dhigan tahay 25% ama ka yar tirada shaqaalaha aad u aqoonsatay inay u qalmaan, barnaamijku waa inuu kala firdhiyaa, si isku mid ah, lacagta haynta oo dhan oo ay ka mid tahay. shaqaalaha xaqa u leh ee hadda shaqeeya.

    Haddii in ka badan 25% tirada shaqaalaha aad sheegtay inay xaq u leeyihiin aanan ka shaqayn barnaamijkaaga, cadadka abaal-marintu waxay u baahan doontaa in dib loo xisaabiyo oo waa inaad la xidhiidho DEELfunding@seattle.gov.

# Su'aalo inta badan la is weydiiyo ee Deeqaha Xasilinta Seattle

1. **Maxay tahay ujeedada Deeqaha Xasilinta Magaalada Seattle?**
   Marka laga soo tago lacag-bixinta tooska ah ee shaqaalaha, Waaxda Waxbarashada iyo barashada Hore (DEEL) waxay sidoo kale sii deyneysaa deeq xasilin ganacsi oo kharash badan leh oo la siinayo bixiyeyaasha xanaanada caruurta shatiga leh ee Seattle si ay u taageeraan ganacsigooda xanaanada caruurta maadaama masiibada ay sii saameynayso qeybtan. Qadarka deeqahani waxay ku salaysnaan doontaa awooda shatiga ee goobta.

2. **Yaa u qalma deeqda xasilinta?**
   Bixiyeyaasha xanaanada carruurta ee guriga ku salaysan iyo xarunta ku salaysan ee DCYF iyo bixiyayaasha da'da dugsiga ee ku yaala xadka magaalada Seattle waa u qalmaan. Bixiyeyaasha aan shatiga haysan iyo saaxiibada qoyska, iyo dariska (FFN) daryeelayaasha ka shaqeeya Degmada King uma qalmaan.

3. **Anigoo ah daryeel ilmo qoys oo shati leh ama bixiye xarun ku saleysan, miyay tahay inaan u furnaado oo aan u adeego carruurta si aan ugu qalmo lacag bixintan?**
   Haa, waa inaad hadda furfuran tahay iyo aad carruurta aqbalayso.

4. **Waa imisa deeqdu?**
   Qadarka abaal-marintu waa mid aan tartan ahayn waxaana lagu xisaabin doonaa iyadoo lagu saleynayo awoodda shatiga.

| Burburinta Deeqaha Kharashka Dabacsan ee Bixiyeyaasha Seattle | |
|---|---|
| **Awoodda shatiga** | **Qadarka barnaamijka** |
| 30 ama ka yar | $1,000 lacag bixin ah |
| 31 – 149 | $65 halkii boos ee shatiyeysan |
| 150 ama ka badan | $5,000 lacag bixin ah |

5. **Maxaa loo isticmaali karaa lacagahan?**
   Waxqabadyada u qalma waa inay taageeraan xasilinta daryeelka carruurta oo laguma koobi karo lacagihii hore ee federaalka. Deeqdan xasilinta, oo ka duwan Lacagta Haysashada, waxay noqon kartaa laakiin**looma baahna**in loo gudbiyo shaqaalaha wakaaladda. Tusaalooyinka isticmaalka la ansixiyay waxaa ka mid ah taageerada caafimaadka dhimirka ee carruurta iyo shaqaalaha daryeelka ilmaha, hawlaha caafimaadka iyo nafaqeynta, helitaanka tallaalka, qalabka ilaalinta shakhsiga, nadiifinta ama qalabyada nadiifinta iyo adeegyada, tababarka la xidhiidha caadooyinka caafimaadka/ammaanka, heerarka shaqada oo kordhay (sida daryeelka caafimaadka , tabarucaadka hawlgabka, mushaarka heerka qoyska si ay u taageeraan qoritaanka iyo sii haynta), mushaarka (lacagta, faa'iidooyinka), ama qayb-bixinta ama ka dhaafka waxbarashada qoysaska diiwaangashan. Lacagaha waxaa loo isticmaali karaa in ka badan hal ujeedo oo ka faa'iideysanaya barnaamijka.

6. **Waa maxay nidaamka codsiga si loo helo deeqdan?**
Waxaa jira hal codsi oo ku saabsan Lacagaha Haynta Xannaanada Ilmaha iyo Deeqaha Xasilinta Bixiyaha ee Seattle. Bixiyeyaasha leh goobo shati badan waa in ay ka codsadaan goob kasta oo leh nambarka aqoonsiga shatiga DCYF gaar ah. Fadlan buuxi codsiga gebi ahaanba, oo ay ku jiraan haddii barnaamijku ku yaallo gudaha xadka magaalada Seattle, iyo aqoonsiga awoodda shatiga leh in lacagahan loo isticmaali doono oo keliya waxqabadyada u qalma (eeg su'aasha 5).

7. **Deeqdani ma la canshuuri karaa?**
Lacagahaas waxaa loo tixgeliyaa dakhli. Ujeedooyinka canshuuraha, deeqaha waa in loola dhaqmaa si la mid ah dakhliga kale ee uu helo ganacsigaaga. Ka raadso talo lataliyaha cashuuraha ee xirfada leh oo ku saabsan saamayntaada ganacsi.

Bixiyeyaasha waxay haysan karaan ilaa 15% lacagaha canshuuraha iyo/ama ajuurada maamulka ee loo qoondeeyay daboolida kharashaadka ganacsiga.

8. **Sideen ku ogaan karaa haddii aan u qalmo?**
Markaad buuxiso foomka codsiga, DEEL iyo CCR waxay xaqiijin doonaan in barnaamijkaagu ku yaalo xadka magaalada Seattle iyo in awoodaada shatiga ay la mid tahay diiwaanada DCYF Waxaad heli doontaa warqad ogeysiin abaalmarin ah haddii aad u qalanto deeqda xasilinta.

9. **Ma heli doonaa deeqda xasilinta si ka duwan Lacagta Haynta?**
Maya, waxaad heli doontaa hal lacag. Ogeysiintaaga abaal-marintu waxay qeexi doontaa caddadka aad heli doonto. Ogeysiisyada abaalmarinta kama dambaysta ah waxaa la samayn doonaa dhammaadka Luulyo. Dhammaan bixiyeyaasha waxaa lagu ogeysiin doonaa xaalada abaal-marinta iimaylka. Bixiyeyaasha waxaa lagu siin doonaa bangiga si toos ah ama jeeg ku geynaya ciwaanka boostada oo ku qoran codsiga. Lacagaha la siiyo bixiyeyaasha waxa la diri doona inta u dhaxaysa Ogosto 1 - Oktoobar 31, 2022.